



Waa maxay CareerForce?

CareerForce waa barnaamij ka jira Minnesota oo isku hagaajiya kartida shakhsiga ah iyo sameysashada shaqo mustaqbal dheer. Wuxuu aan la xiriirnaa oo uu iskaashi naga dhaxeyaa meelo badan gobolka oo dhan oo si wadajir ah waxaa nooga go'an in ay natiijooyin farxad leh helaan dadka shaqa-doonka ah, shaqa-bixiyeyaasha, dadka Minnesota. Qof kasta waxaa uu heli karaa barnaamijyada iyo adeegyada ay hayaan goobaha CareerForce ee gobolka oo dhan oo waxay ku jiraan **CareerForceMN.com**.

NAGALA Soo xiriir

Trade Adjustment Assistance
Minnesota Department of Employment
and Economic Development

1st National Bank Building
332 Minnesota Street, Suite E200
St. Paul MN 55101

Talefoonka: 1-888-234-1330
ama 651-259-7543
Boostada Intarnetka: deed.taa@state.mn.us

CareerForceMN.com/TAA

BOOQO

CareerForceMN.com/TAA
wixii faahfaahin
dheeraad ah

Haddii ay maclumaadkan oo ku qoran siyaabo kale soo codsadaan dadka naafada ah, waa ay naga helayaan.

Goobaha CareerForce Minnesota waa meelo loo siman yahay si looga helo fursado kala ah shaqo iyo adeegyo.

CareerForce waxaa farxad u ah in ay tahay xubin la shaqeysa dalladda xarumaha shaqada ee Mareykanka.


CareerForce™
Minnesota's Career Resource



Dib ugu Noqoshada
Shaqada ka dib
Markii ay
**Nooc Shaqo ah
kaa Dhammaatay**

DIB UGU NOQASHADA SHAQADA

iyadoo ay ku caawineyso
Trade Adjustment Assistance
(Caawimaadda La-qabsiga
Xirfadaha ama TAA)

Barnaamijka TAA waxaa masuul ka ah dowladda dhexe si ay ugu caawiso shaqaalaha ay shaqadii ka dhammaatay, kuwa khatarta ugu jira in ay shaquadu ka sii dhammaato, ama kuwa ay ka yaraatay saacadhii shaqada ama mushaarka iyada oo ay ugu wacan tahay tartan uga yimid dibadda.

Adeegyada TAA waxaa loo naqshadeeyey in ay noqdaan caawimaad dib loogu helo shaqo la mid ah ama ka fiican shaqo dadka ka dhammaatay ama ay khatar ugu jiraan in ay ka dhammaato.

TAA OO LA SHAQEYSA BARNAAMIJK SHAQAALHA BARAKACAY WAXA LAGA HELAYAA

Adeegyo Shaqa-helid Cusub

- Talooyin Shaqa-helid
- Xirfado iyo Qiimeyn Taasi Qofka
- Shaqo-raadis, arji-qorid, iyo tababarro ah wareysiada shaqada oo gaar ah
- Adeegyo Shaqa-Raadis Shakhsii Ahaaneed

Lacag Shaqo-raadsi

Kharashka shaqa-raadsiga ee meelaha ka baxsan deegaan lagu nool yahay

Lacagta Dibu-degidda

Kharashka shaqa-raadsiga ee la socda dibu-degidda meel shaqa ka baxsan deegaan lagu nool yahay



Adeegyo Tababar

Shaqaalaha xaqa u yeeshaa waxay kala dooran karaan fursadaha tabarbarka soo socda oo wakhti gaar ah:

- Tababar galaas/internet (wakhti gaaban ama wakhti dheer)
- Tabarbarka Goobta Shaqada
- Farsama-barasho/tababar shaqa-bixiye

Tabarbarka galaaska wuxuu isugu jiraa:

- Shuruudaha la isaga rabo oggolaanshaha barnaamijka tabarbarka
- Koorsoojin lagu qaato shahaado tacliin sare, dibloomo ama aqoonsi xirfadaha suuqa shaqada

Trade Readjustment Allowance (Lacagta La-qabsiga Shaqadae ama TRA)

Dheereynta lacagta ceymiska shaqada ee shaqaalaha xaqa u leh ee ku qoran tababar buuxa oo ay TAA aqoonsatay

Lacagta Gaadiid-raacidda iyo Tashiilidda Duruufaha Nolosha Kharashka aadidda tababar ka baxsan deegaan lagu nool yahay

**Reemployment Trade Adjustment Assistance
(Caawimaadda La-qabsiga Shaqa Cusub ama RTAA)**
Gunno kabis ah oo la siiyo shaqaalaha da'doodu tahay ama ka weyn 50 sano haddii uu dhib uga yimid shaqa cusub oo ay ka lacag yaraatay suuqa shaqada

Canshuur-celiska Kharashka Caafimaadka ama HCTC
HCTC waxay bixisa 72.5% markay jirto bixinta lacagta ceymiska caafimaadka ee dadka xaqa ugu leh iyo qoysaskooda; oo hay'adda canshuurta ee IRS ayaa maamuleysa

TAA

Habka Oggolaanshaha
Codsiga

- 1 Goob shaqo ayaa la xiray, shaqaalihii ayey u hanjabtay, ama shaqaalihii ayey iska eriday.
- 2 Koox shaqaale ah saddex qof ama ka badan, hawl-wadeen shirkad, wakiilka ururka shaqaalaha, ama meel la shaqeysa CareerForce ayaa codsi u **soo gudbin kara U.S. Department of Labor's Office of Trade Adjustment Assistance (OTAA) (Caawimaadda La-qabsiga Xirfadaha ee Waaxda Shaqaalaha Mareykanka)**.
- 3 OTAA waxay eegeysaa codsiga.
- 4 OTAA waa in ay soo oggolaato haddii xaq loogu leeyahay ama aan loogu lahayn TAA.

WAXA KUUGU XIGA

- 1 Haddii codsiga la soo oggolaado, TAA waxay boosto gacan ka dhiib ah ku soo direysaa waraaq sheegeysa xaqa lagu yeeshay iyo buug gacan-qabsi ah (TAA Handbook).
- 2 La xiriir xafiisyada caawiya Shaqaalaha ay ku Dhacday Bara-bixidda si wax laguugu bilaabo; adeeg kasta oo ah TAA waxa uu leeyahay jadwal u gaar ah. Xafiisyadaas waxaa laga heli karaa: mn.gov/deed/job-seekers/recently-unemployed/layoff/dwp-service-providers.jsp